

Jidhkaagu sida dabiiciga buu ku wacan yahay

Adiga oo keliya ayaa u talin kara
Cidna xaq uma leh in ay qof kale jidhkiisa wax ka jarto



NKVTS

Informasjon om kjønnslemlestelse
Somalisk utgave

Buuggan waxa diyaariyey Rugta wadani-
ga ah ee aqoonta gacan-ka-hadalka iyo
istereska ka dhasha (NKVTS). Buug- gan
waxaa laga heli karaa boggayaga internet-
ka www.nkvts.no

Soosaaristii 3-aad, dib u eegis 2019

Koobi daabacan waxa laga dalban karaa
postmottak@nkvts.no ama telefoonka 22
59 55 00.

Markii ay Xukumaddu samaysay qorshaha
la-dagaalanka naafaynta xubnaha ee
soo baxay 2008-2011 , waxa NKVTS loo
xilsaaray inay abuurto kaalin heer qaran
ah oo ka masuul ah aqoonta ku saabsan
naafaynta xubnaha taranka. NKVTS waxay
samaynaysaa cilmi-baadhis, aqoon gudbin
iyo la talinta dadka ka shaqeeya mawdu-
ucan.

Farshaxan:

Christine Istad iyo Kari Gjæver Pedersen

Sawir-gacmeedka bogga 8-9:

Kari C. Toverud CMI (sawir-gacmeedle
caafimaad oo la aqoonsaday)

Sawir: Luth og co AS

Garaafaka Sheyga: 07 Media – 07.no



Jidhkaaga adaa iska leh

Cidna xaq uma leh in ay dhaawacdo jidhkaaga. Adaa iska leh, adigaana u talin kara. Markaad tahay sabi, ilmo yar ama dhalinyaro waxaad u baahan tahay in dadka waaweyn ee kugu hareeraysani fahmaan arintaas.

Gabdhaha qaar waxa qoyskooda kaga yimaada cadaadis ku saabsan in xubnahooda taranka wax laga bedelo si ay sharaf u yeeshaan. Hadii aad xaaladan ku sugan tahay ogow in sharciga Norway loo sameeyay inuu ku ilaaliyo.

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo in dhaawac lagu gaadh siiyo. Hadii jidhkaaga qayb la gooyo weligaa dib uma helaysid.

Marka aad hooyo noqotid, waa inaad ogaatid in gabadhaadu leedahay jidh ka dhammaystiran oo waxba ka dhinayn. Xubnaheeda taranku waxay qayb ka yihiin wax wada socda oo qayb kasta ay tahay muhiim.

Ma u baahan tahay cid aad la hadashid?
Ma u baahan tahay caawimo?
Buuggan xagiisa danbe eeg.

Jidhku si dhamaystiran buu u abuuran yahay



Naafaynta xubinta taranku waa ku halis caafimaadka

Naafaynta xubinta taranku waa qaliin wax ka beddelaya oo lagu jarayo qaybaha hore ee xubinta taranka gabdhaha. Hadba inta la goynayo aad ayey u kala duwan tahay. Qaliinka waxa inta badan la sameeyaa marka gabdhuhu jiraan inta u dhaxaysa 5 iyo 14 sanno jir, laakiin xataa waxa lagu sameeyaa carruurta aad u yaryar iyo gabdho ka weyn 14 sanno.

Naafaynta xubnaha taranka waxay dad badani u yaqaanaan gudniin, sunayn ama ereyo kale. Naafaynta xubnaha taranka ee gabdhaha ama hablaha loo geystaa wuu ka balaadhan yahay waanu ka khatarsan yahay gudniinka wiilasha, labadan qalitaana la isma barbardhigi karo.

Noorway waa ka madnuuc dhammaan noocyada naafaynta xubnaha taranka. In wax yar ama wax badan la gooyo waa madnuuc labaduba. Ma jirto sabab loo beddelo jidhka hablaha caafimaadka qaba.

Naafaynta xubnaha taranku waxay keentaa dhibaato caafimaad. Waxa qofka ku dhici kara dhaawac ku ooli doona intuu noolyahay. Taas darteed waa ka madnuuc inta badan wadamada. Maadaama ay saxeexday heshiisyo caalami ah, waxa Noorway ku waajib ah inay joojiso dhaqannada dhaawaca gaadhsiisa caafimaadka. Mida kale naafaynta xubinta taranku waa madnuuc ah marka la eego xeerarka ciqaabta. Ujeedadad madnuucistu waa in gabdhaha ku koraya Noorway, laga ilaaliyo qaliin noocaas ah.

Waxaa ku adkaan karta dhallinyarada in ay mawduucan ka hadlaan sababto ah waa arin laga gaabsado ka hadalkeeda. Sidoo kale habalaha aan lagudin ayaa suaalo ka qabi kara dhaqankan. Waxaa dhici karta in ay ka werwersan yihiin walaalahood ama cid ay yaqaanaan oo markaasna ay u baahan yihiin aqoon dheeraad ah. Buuggan waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan:

- naafaynta xubnaha taranka ama gudniinka.
- aragtida laga qabo naafaynta xubnaha taranka
- sida jidhku asal ahaan u sameysan yahay
- dhibaataada caafimaad ee ka iman karta naafaynta xubnaha taranka
- sharciga mamnuucaya naafaynta xubnaha taranka ee haweenka
- goobta aad ka heli karto caawimo



Aragtiyaha laga qabo naafaynta xubnaha taranka.

Dadka ku dhaqma naafaynta xubinta taranku waxay sheegaan arrimo kala duwan oo dhaqankaas ka dhigay lagama maarmaan. Halkan waxannu ku soo qaadanaynaa kuwo ka mid ah fikradaha ugu baahsan.

Gudniinku wuxuu gabadha ka ilaali- yaa in loo galmoodo.

Naafaynta xubnaha taranku meesha kama saaraso baahida galmada, waayo hamadu waxay ka timaadaa maskaxda iyo fikirka. Naafaynta xubnaha taranku ma joojinayso galmada guurka ka hor, gogoldhaafna kama hortagayso. Sidoo kale way fududahay inaan la samayn galmo ama gogoldhaaf gudniin la`an. Daacadnimada iyo is-xakamayntu waa wax qofka ku xidhan.

Gudniinku waa dhaqan sooyaal ah oo cid waliba sameyso. Si aanay gab- dhuhu u soocnaan ama loo takoorin waa in la guda.

Dadka dunida ku nool intooda badani kuma dhaqmaan naafaynta xubnaha taranka ee haweenka. Aqoonta loo yeeshay halista dhaqankan ayaa keen- tay in dad badani ka soo horjeestaan naafaynta xubnaha taranka, iyada oo ay ku jiraan bulshooyin caadadan hore ugu dhamqi jiray.

”Laakin in yar ayuun baynu jari karnaa“

Dhulalka lagaga dhaqmo naafaynta xubinta taranka nooca daran, ayaa hadda dad badan rabaan inay uga wareegaan nooc ka fudud. Noocaas magacyada loo yaqaano waxa ka mid ah «sunna». fudud, hadana sunnaha waxa inta badan ka mid ah in cad laga gooyo kintirka iyo faruuryaha gudaha, oo in badana loo raaciyo dhowr qodob. Waalidiinta, dadka wax guda iyo wadaadadu mai sku raacsanaha waxa sunnahu ka koobanyahay, inta badan noocani wuu ka daran yahay sida dad badan u moodayaan. Taas darteed nooc kasta oo gudniin ah waa madnuuc.

Gabdhaha aan gudnayn, lama guur- sado.

Rag badan oo ka soo jeeda wadamada lagu yaqaano ku dhaqanka naafaynta xubinta taranka ayaa og halista caafimaad ee ka yimaada

naafaynta xubinta taranka, taas darteedna ma rabaan in xaaskooda lagu sameeyo. Habluhu waxay xaq u leeyihiin in la ixtiraamo, haddii xubinta taranka laga naafeeyey iyo haddii kaleba.

Diinta ayaa faraysa gudniinka

Ma jirto diin amraysa in haweenka la gudo. Waxayse diimo badani shee- gayaan inaan la dhaawacin abuurta. Jidhkaaguna abuurta ayuu ka mid yahay. Muslimiinta qaar ayaa sheegaya in diinta islaamku taageerayso gudni- inka gabdhaha. Laakiin muslimiinta

badankoodu kuma dhaqmaan gudni- inka.

Waa muhiim in la raaco rabitaanka iyo dhaqanka waalidka.


Dhaqamada halista ah waa in lala dagaalamo. Gudniinku waa halis waa- na mamnuuc sharciyan. Haddii ay waal- idkaagu rabaan in ay ku gudaan, xitaa haddii ay tahay jacayl dartii, waxaad xaq u leedahay in aad diido. Waa lagaa caawin karaa sidii aad u diidi lahayd, meeshii aad la soo xidhiidhi lahaydna ka eeg buuggan xagiisa danbe.



Qaabka jidhka loo abuuray

Xubinta taranka ee haweenka ee dabiiciga ah

Ma loo baahna in wax laga gooyo qaybo ka mid ah, ama in la xidho, xubinta taranka haweenka. Xubnaha taranka ee haweenku waxay leeyihiin shaqooyin kala duwan, jidhkuna wuxu u samaysanyahay inuu qabto hawlahaas. Naafaynta xubinta taranku waxay keenaysaa in dhaawac soo gaadho awooda dabiiciga ah ee jidhku ku qaban karo hawlahaas.



Waxaa qumaati loo arkikaraa oo keliya kintirka, afka xubinta taranka iyo afka dhuunta kaadima-reenka marka dhinac loo leexiyo faruuryahaha.aside.

Kintir

Xubin neerfeyaal badan leh oo dardar gelisa galmada, inteeda badnina ku qarsoontahay jidhka xaggiisa hoose. Madaxiisa oo keliya ayaa dibeda laga arkaa waxaanu leeg yahay xabad digir ah badhkeed.

Afka dhuunta kaadi mareenka

Afka dhuunta kaadimareenka, wuxuu ku yaalaa afka hore ee xubinta taranka.

Faruuryaha xubinta taranka ee hoose

Waxay daboolaan oo ilaalinayaan afka xubinta taranka iyo dhuunta kaadi mareenka.

Afka xubinta taranka

Waa xubin kala baxda oo isku soo noqota sida cinjirka oo kale, tusaale ahaan xilliga dhalmada.

Maqaarka kore

Wuxuu daboolaa islamarkana ilaaliyaa kintirka

Faruuryaha kore

Waxay ilaalin dheeraad ah siiyaan faruuryaha hoose iyo qaybo kale. Sida caadiga ah afka xubinta taranka iyo afka dhuunta kaadi mareenka waxa daboolaa faruuryaha kore iyo kuwa hoose.

Xuubka bikrada


Xuubka khafiika ah oo ka hooseya faruuryaha wuxuuna u furanyahay dhuunta xubinta taranka. Xuubkaasi wuxuu sida caadiga ah u furan yahay caadada, wax dhaawac ama burbur ahina kuma soo gaadhaan galamda koobaad.

Noocyada naafaynta xubnaha taranka ama gudniinka

Sidan ayuu u kala qaybiyey Ururka Caafimaadka Aduunka (WHO). Run ahaantii waxaa dhacda in aan lakala saari karin noocyada kala duwan ee naafaynta xubnaha taranka ee haweenka.


Nooca 1-aad: Madaxa kintirka oo dhamaan ama qayb la jaro (klitoridektomi). In la ogaado ama la arkaa way adkaan kartaa.

Nooca 2-aad: Madaxa kintirka iyo faruuryaha xubinta taranka ee gudaha oo dhamaan ama qayb la jaro (eksisjon).



Nooca 2-aad

Nooca 3-aad: Yaraynta afka xubinta taranka. Qaybo ka mid ah faruuryaha hoose iyo kuwa kore oo la jaro, la isu keeno oo la tolo si uu u samaysmo cad daboolka afka xubinta taranka. Sida badan waxa kaloo la jaraa qayb ka mid ah madaxa kintirka (infibulasjon).



Nooca 3-aad

Nooca 4-aad: Qaalitaanada kale ee halista ah ee lagu sameeyo xubinta taranka haween-ka kuwaas oo aan loo sameyn sabab caafimaad sida: mudid, daloolin, jarid, xoqid ama gubid.

Raadadka caafimaad darro

Nooca Dhibaatooyinka ka imanaya naafaynta xubinta taranka waxay ku xidhantahay nooca naafaynta, da'da gabadha, meesha la joogo iyo sida nadaafadda loo ilaaliyo xilliga qalliinka. Waxa iyana macno leh aragtida qoyska iyo bulshada ku nool meesha lagu samaynayo qalliinka iyo meesha qofku dego. Qalliinka naafaynta ee loo sameeyo sidii caadada ah iyo ka lagu sameeyo cisbitaalku way ka simanyihiin dhibaatooyinka kai man kara. Dhibaatooyinka qaar ka mid ah ayaa ah degdeg, kuwo kalena waxay iman karaan xilliyo dambe.

Dhibaatooyinka degdegga ah ee ka iman kara dhammaan noocyada naafaynta xubinta taranka:

- xanuun aad u badan
- dhiig-bax halis noqon kara
- infekshanno halis noqon kara
- jabniin iyo dhaawacyo kale oo ku iman kara haddii gabadha loo isticmaalo awood marka ay dareento xanuun.
- naxdin weyn (shook)

Dhibaatooyinka xilli dambe ka iman kara noocyada naafaynta xubinta taranka

Nooca 1 iyo 2: Goynta madaxa kintirka iyo faruuryaha gudaha

(loona yaqaano magacyo ay ka mid yihiin *tahoor, tahara iyo sunna*)

- **Infekshan:** Marka la gooyo faruuryaha waxa dabool la'aan noqonaya xubinta taranka, waxaanay markaa u nugushahay xanuun qaadis iyo infekshan.
- **Burooyin:** Qanjidho ayaa xidhmi kara, waxaana markaa wakhti kadib ka soo bixi kara burooyin.
- **Boog-hoosaad:** Burooyinka waxa geli kara wasakh ama cudur, waxaanay keeni karaan kaar iyo dhib.
- **Raad nabar:** Meesha lagu sameeyey naafayn xubin taran waxay yeelan kartaa raad nabar oo ah mid qaro weyn, adag oo dhib leh. Nabarrada qaar ayaa weynaada oo noqda kuusas waaweyn.
- **Galmada:** Waxa yaraan kara raaxada laga dareemayo xubinta taranka sababtoo ah dareenka oo yaraaday ama xanuunka.
- **Xilliga dhalmada:** Nabaradii hore ayaa yaraynaya in nuduhu adkaadaan taasoo kordhinaysa halista in maqaarko u jeexmo si aan lahayn kantarool.

- **Cabsi iyo dhaawacyo niyadda ah:** Xanuunka iyo xasuusta xanuunka, cabsida iyo awood la'aanta ee ka yimi in qofka qasab lagu qabtay ayaa keeni xasuus xun oo dhib noqon karta mustaqbalka. Waxa tusaale ahaan ka mid noqon kara samaynta galmada, dhalmada iyo baadhitaannada ay samaynayaan dhakhtarka haweenka.

Nooca sunnaha waxa inta badan lagu sheegaa inuu yahay nooc khafiif ah oo dhib lahayn. Arrintaasi sax maaha. Run ahaantii waxa la gooyaa ku dhawaad kintirka oo dhan iyo dhammaan ama qayb ka mid ah faruuryaha gudaha. Waxaana inta badan la isku tolaa ama isku dhega faruuryaha gudaha iyo kuwa kore, taasoo runtii ka dhigan in la yareeyey afkii xubinta taranka (infibulasjon).

Type 3: Yaraynta afka xubinta taranka (Infibulasjon)

(loona yaqaano magacyo ay ka mid yihiin *fircaoni*)

Dhibaatooyinka lagu soo sheegay nooca 1 iyo 2 waxa qofka lagu sameeyey fircooniga u dheeraan kara:

- **Infekshan iyo xanuun:** Marka ay isku dhegaan faruuryuhu waxa xidhmi karta meeshii uu soo mari lahaa dhiiga caadada. Kaadida iyo qoyaanka ayaa ku dhex ururi kara jidhka gudahiisa. Arrintaasi waxay keeni kartaa xanuun marka la kaajayo ama xilliga dhiiga caadada. Dhiiga ku urura ferjiga ayaa keeni kara xanuun iyo infekshan.
- **Dhaawacyo gudaha ah:** Cadaadiska ka imanaya kaadida iyo dhiiga, iyo infekshanka fida ayaa keeni kara in isbeddello iyo dhaawacyo ku iman karaan unugyada gudaha. Ururka kaadida ayaa keeni kara in dhagxaan ku abuurmaan kaadi-haysta oo keeni kara dhaawacyo kelyo oo waaweyn. Kaadida ayaa isla markaana geli karta gudaha ferjiga.
- **Uur-qaadista ayaa adkaan karta:** Daraasado-cilmiyeed ayaa muujiyey in suurtagalnimada dhalmo-la'aantu sii kordhayso marka nooca naafayntu sii daranyahay.
- **Galmada:** Naafaynta fircooniga ah waa in la furo si oo samayn karo galmo. Nabarrada iyo neerfeyaal ayaa keeni kara in taabashadu tahay wax xanuun badan qofku si fudud u damqado. Galmada ayaa noqon karta wax xanuun ah oo adag.
- **Xilliga dhalmada:** Naafaynta fircooniga ah waa in inta badan la furo si ilmuhu u soo bixi karo xilliga dhalmada.

Mar kasta oo fircoonigu si weynyahay, iyo marka uu dheeraado wakhtiga u dhexeeya xilliga la sameeyey fircooniga iyo marka la furayo, waxa sii badanaya halista ah ay yimaadaan dhaawacyo waaweyn.

Taariikhda iyo baahsanaanta gudniinka

Cidna si rasmi ah uma oga sababta keentay in wax laga jaro xubnaha taranka ee haweenka. Waxaase la ogayahy in dhaqankani in dhaqankani soo jiray kumanaan sanandood ka hor diimaha masiixiga iyo islaamkaba.

Naafaynta xubnaha taranka waxa ku dhaqma muslimiin, masiixiyiin iyo iyo dad aaminsan diimo kale. Muslimiinta iyo masiixiyiinta dunida ku nool badankoodu naafaynta xubnaha taranka kuma sameeyaan gabdhohooda.

Ma jirto diin faraysa naafaynta xubnaha taranka in gabdhaha lagu sameeyo.

Qoomiyadaha ku dhaqma dhaqanka naafaynta xubinta taranka, waxa ay dhaqankaas ku soo dhaqmayeen jiilal badan, caadaduna waxay noqotay qayb ka mid ah dhaqankooda. Waa caado muddo dheer soo jirtay isla markaana bulshada ayaa qofka ku cadaadin karta inuu ku dhaqmo. Bulshooyin badan ayaa naafaynta xubinta taranka ku dhaqma iyadoo ujeedadu tahay in la kantaroolo galmada haweenka. Aqoon la'aan jirta, gaar ahaan dhinaca dhibaatooyinka caafimaadka ee iman kara, ayaa sabab u ah in weli lagu sii dhaqmo naafaynta xubinta taranka.

Dhaqankani wuxuu ku fidsan yahay qaybo ka mid ah qaarada Afrika, laakin waxaa kaloo ku dhaqma qoomiyado ku nool Bariga Dhexe iyo wadamada Induneesiya, Malaysiya iyo Hindiya.

WHO waxay qiyaastay inay aduunka jiraan 200 milyan oo hablo iyo haween oo lagu sameeyey naafaynta xubinta taranka. Marka aduunka oo dhan la isku daro waxa ay boqolkiiba 90 ay yihiin noocyada I iyo II, halka boqolkiiba 10 yihiin nooca III. Noorway nooca ugu badan waa III, maadaama ay ajnabiga ugu badan ka yimaadaan wadamo uu noocaasi ku badanyahay.

Wadamadee lagaga dhaqmaa naafaynta xubinta taranka?

Shaxda hoose waxay muujinaysaa sida wadamada kala duwan uga jirto naafaynta xubinta taranka. Inta badan waddan kasta gudahiisa ayuu aad ugu sii kala duwanyahay noocyada naafaynta iyo inta ku dhaqanku leegyahay. Tasmadani waxay ku salaysantahay u kuurgal ay sameeyeen hay'addo waaweyn oo caalami ah oo si toos ah uga shaqeeya la dagaalanka naafaynta xubinta taranka, oo ka mid yihiin UNICEF, UNFPA, UNPD, USAID iyo WHO.

< 19 %	20-49 %	50-79 %	80-100 %
Benin	Ivory Coast	Burkina Faso	Jabuuti
Gaana	Guinea-Bissau	Itoobiya	Masar
Ciraaq	Kiinya	Gaambiya	Eritereeya
Yemen	Nayjeeriya	Indoneesiya	Guinea
Kameruun	Senegal	Libeeriya	Maali
Niiger	Jamhuuriyada Badhtamaha Afrika	Mauritania	Sierra Leone
Tansaaniya	Tsjad		Soomaliya
Toogo			Suudan
Uganda			

Waxa iyana daraasaddo yaryar oo sheegaya in naafaynta xubinta taranka ay ku dhaqmaan bulshooyin ka tirsan wadamo ay ka mid yihiin Iraan, Malaysiya, Cumaan, Emiraatka iyo Taylaan.

Haddii aad rabtid tirakoob dheeraad ah, ka eeg:

kjonnslemlestelse.nkvts.no

Xeerka ciqaabta §§ 284 iyo 285

Xeerka ciqaabta waxa laga bilaabo 1-dii oktoober 2015 lagu soo daray qodobdo madnuucaya naafaynta xubinta taranka. Waxa lagu beddelay xeerkaa u gaarka ahaa naafaynta xubinta taranka ee soo baxay 1995. Xeerka ciqaabtu waxa uu qof kasta oo degan Norway ka madnuucayaa ku dhaqanka naafaynta xubinta taranka. Waxa markaa iyana ka madnuuc ah in hablaha lagu soo naafeeyo waddank kale. Ujeedada madnuucista naafaynta xubinta taranka ayaa ah in hablaha laga ilaaliyo in lagu sameeyo naafaynta xubinta taranka.

Madnuuca

Haddii lagu geysto naafaynta xubinta taranka adiga oo degan Norway, isla markaana waalidkaagu awoodeen inay joojiyaan, waxa markaa waalidkaagu sameeyeen wax sharci-darro ah. Qofka sameeya naafaynta xubinta taranka iyo qofka ka qaybqaataba waa la ciqaabi karaa. Taas macnaheedu waxa weeye in waalidkaaga, ama dad kale, loo ogolayn inay kuu geeyaan qof samaynaya qalliin noocaas ah, ha ahaato Norway gudaheeda ama waddan kale. Waa sharci-darro xataa adigu aad rabtid in lagugu sameeyo naafaynta xubinta taranka.

Haddii aad la degantahay dad kale oo aan ahayn waalidkaaga, waxay dareemi karaan inay masuul ka yihiin in lagugu sameeyo naafaynta xubinta taranka. Waxay rabaan inay sameeyaan waxa ay filayaan in laga rabo. Waxa kale oo aad ka feejignaataa in lagugu samayn karo naafaynta xubinta taranka haddii aad xilliga fasaxa la joogtid awoowe/ayeeyo ama dad kale oo degan waddanka waalidkaagu ka yimaadeen.

Xeerku waxa kale oo uu madnuucayaa in dib loo soo celiyo naafaynta hore. Taasoo macnaheedu yahay in aan sharci ugu ogolayn in dib loo tolo haween hore u lahayd toliin laakiin dhalmo darteed loo furay.

§ 284. Naafaynta xubinta taranka

Ciqaabtu waxay noqonaysaa ilaa 6 sanno oo xabsi ah marka qof qaliin ku sameeyo xubinta taranka haweeney oo isla markaana uu xubinta taranka gaadhsiyo dhaawacyo ama isbeddelo joogto ah. Dib u samaynta naafaynta xubinta taranka ayaa iyana la ciqaab ah.

Ogolaansho laga helay qofka, ma lagu noqonayo dembi la'aan.

Ganaax lacag ah ama xabsi ah ilaa 1 sanno ayaa lagu ciqaabayaa xirfadleyda iyo shaqaalaha xannaanooyinka, hay'adda maadinta carruurta, SFO iyo ururrada diimeed, ee iyagoo booliska ka dacwayn kara ama si kale samayn kara, joojin waaya naafaynta xubin taran oo qof lagu samaynayo. Qodobkani waxa kale oo uu khuseeyaa masuuliyiinta horjoogayaasha iyo hogaamiyayaasha ururrada diimeed. Masuuliyadda ka hortagga way saarantahay xataa haddii ay waajib ku tahay inay sirta qariyaan. Xil-gudasho la'aantu ma leh ciqaab haddii aan la hirgelin naafaynta xubinta taranka ama aan la samayn isku day dembi ah.

§ 285. Naafaynta xubinta taranka ee weyn

Naafaynta xubinta taranka ee weyn waxa lagu mutaystaa ilaa iyo 15 sanno oo xabsi ah.

Marka la eegayo in naafaynta xubinta taranku tahay mid weyn waxa si gaar ah loo tixgelinaya in qaliinku keenay arrimahan

- a) cudur ama halwagabnimo shaqo oo muddo jirta, eeg. § 274,
- b) laxaad dhinaan, cillad ama dhaawac dawo lahayn, ama
- c) Geeri ama dhaawac weyn oo ku dhacay jidhka ama caafimaadka.

Waajibka ka hortaga

Waajibka ka hortagu wuxuu farayaa qaybo ka mid ah shaqaalaha dawlada iyo kuwa rayidkaba inay isku dayaan inay joojiyaan inta aan la fulin gudniinka haweenka.

Markay helaan xog ku saabsan in cid lagu sameynayo naafaynta xubnaha taranka ee haweenka wuxuu sharcigu waajib kaga dhigayaa in ay joojiyaan in gudniinku dhaco, tusaale ahaan iyagoo wargelinaya waaxda ilaalinta caruurta (barnevern) ama booliska. Waajibkan ayaa ka hor maraya waajibka sir qarinta.

Ciqaab baa lagu mutaysanayaa ka qaybqaadashada in cid naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyo, ama la iska indhatiro oon laga hortegin, laakiin denbi ma leh qofkii naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyaa.

Waajibka wargelinta

Naafaynta xubnaha taranka ee haweenku waa dayacid daryeel oo aad u weyn. Shaqaalaha dawlada iyo kuwa rayidka ahba waajibka ka hortaga waxa u dheeraan kara waajib ah in ay hay'ada ilaalinta caruurta (barnevern) wargeliyaan haddii ay ka war helaan dayacid daryeel caaruureed. Waxa dhici karta in aad adigu halis ugu jirtid in naafaynta xubnaha taranka ee haween- ka lagugu sameeyo ama walaalaha halis ugu jiraan in naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyo ama adiga ama walaalaha dhibaato caafimaad idin hayso laakiin aydaan helin caawimadii aad u baahnaydeen.

Fursad wadahalal iyo baadhitaan xubinta taranka oo aan khasab ahayn

Laga bilaabo sannadkii 2010 waxa dhammaan degmooyinka waddanka ay bilaabeen fursad ah in baadhitaan lagu sameeyo hablaha iyo haweenka ka soo jeeda meelaha ku dhaqanka naafaynta xubinta taranku uu ka badanyahay boqolkii 30 ama ka badan. Qof kasta waxa uu fursadaas helayaa sannad gudahii kadib marka uu yimaado Noorway.

Waalidka ka yimaadaa wadamada uu ka jiro dhaqanka naafaynta xubinta taranku waxa la siinayaa fursad wadahal oo ku saabsan naafaynta xubnaha taranka ee haweenka markay gabadhu dugsiga ama iskuulka bilaabayso iyo markay fasalka shanaad gaadho, waxa kale oo fursad loo siinayaa in gabadha xubinteeda taranka baadhitaan lagu sameeyo.

Dugsiga dhexe waxa hablaha ay khusayso iyaga fursad loo siinayaa wada- hadal iyo baadhitaan xubinta taranka ah oo aan khasab ayan.

Ka hor intaan la samayn baadhitaankaas waa in la hayo ogolaansho qoraal ah oo lagu ogolaanayo baadhitaanka. Hablaha jira 12 sanno ama ka yar, waxa la baadhayaa marka ay waalidku ogolaadaan. Marka ay u dhaxayso 12 iyo 16 sanno , dadka samaynaya baadhitaanka go'aaminaya in gabadhu iskeed u bixin karto ogolaansho. Markaas oo kale gabadha ayaa iskeed u codsan karta baadhitaan lagu sameeyo hoosteeda. Markay buuxsanto 16 sanno jir ayey gabadhu awood u leedahay inay iskeed bixiso ogolaansho.



Naafaynta xubinta taranku waa sir dad badan qarsadaan. Markaas oo kale waxa fiican in qofku ogaado in kaalkaalisoooyinka caafimaadka iyo dhakhaatiirku leeyihiin aqoon, isla markaana ay iyaga waajib ku tahay inay qariyaan sirta. Hay'adaha samofalka iyo hay'adaha dawladda ayaa ku caawin kara haddii aad ka cabsanaysid in lagugu sameeyo naafaynta xubinta taranka. Waxaad weydiin kartaa su'aalaha aad qabtid, adoo isla markaa u baahnayn inaad sheegtid qofka aad tahay.

Meelahan ayaad ka heli kartaa caawimo:

- kaalkaalisada caafimaad ama la-taliyaha iskuulka ama degmada aad degantahay
- dhakhtarkaaga joogtada ah ama dhakhtar kale
- Telefoonka Laanqeyrta Cas (Røde Kors), tel. 815 55 201 – halkan ayaad soo wici kartaa adiga oo isa sheegin
- Telefoonka degdegga ee carruurta iyo dhallinyarada, tel. 116 111
- umulisada xarunta hooyada iyo dhallaanta (helsestasjonen) xilliga uurka
- Kooxda Aqoonta la dagaalanka guurka qasabka ah, naafaynta xubinta taranka iyo kantaroolka nolosha qofka ee xun, tel. 478 09 050.
- booliska, wac 02800.

Baraha internetka ee laga helo macluumaadka:

ung.no seif.no kjonnslemlestelse.nkvts.no

Caafimaad-goboleedyada iyo fursadaha caafimaadka:

Caafimaad-goboleed kasta waxa ka jira qayb haween oo masuuliyad gaar ah ka saaran tahay caawinta hablaha iyo haweenka loo geystay naafaynta xubinta taranka. Waxa laga helaa wadahadal, baadhitaan, daaweyn iyo qaliinno furitaan ah oo qaliin maalin ah (jiif ahayn). Toos ayaa loola xidhiidhi karaa ama dhakhtar, kaalkaaliso ama umuliso ayaa kuu gudbin kara. Iyaga waxa saaran waajib sir-qarin, waxaanay ka jawaabi karaan su'aalaha.

Universitetssykehuset i Nord-Norge, Tromsø. La xidhiidh xafiiska dhexe, tel. 77 62 60 00 ama qaybta haweenka, tel. 77 62 70 57.

Haukeland Universitetssjukehus, Bergen. La xidhiidh xafiiska dhexe, tel. 55 97 50 00 ama qaybta haweenka, tel. 55 97 42 36.

St. Olavs Hospital, Trondheim. La xidhiidh xafiiska dhexe, tel. 72 57 30 00 ama qaybta haweenka, tel. 72 57 12 12.

Stavanger Universitetssjukehus. La xidhiidh xafiiska dhexe, tel. 51 51 80 00 ama qaybta haweenka, tel. 51 51 94 10.

Oslo Universitetssykehus Ullevål. La xidhiidh xafiiska dhexe, tel. 22 11 80 80 ama qaybta haweenka, tel. 22 11 98 44.

Sørlandet sykehus, Kristiansand. La xidhiidh xafiiska dhexe, 38 07 30 00 ama qaybta haweenka, tel. 38 07 30 70.

Vestre Viken, Drammen. La xidhiidh xafiiska dhexe, tel. 03525 ama qaybta dhalmada, tel. 32 80 46 06.

Ka caawi ilmaha siduu naftiisa ugu talin lahaa





Jidhkaaga adigaa iska leh